

## **Kharash-bixintii lagu soo diray ma ka badnayd kuwii hore?**

**Kharashka warqadda lacagaha lagu bixiyo ku qoran ee imminka lagu soo diray wuu badan yahay. Taasoo u sabab ah wax iska beddelka qaabka canshuuraha tamarta loo bixiyo. Haseyeeshe, waa isbedel aan saamayn ku yeelan doonin isku-darka kharshyada korontada.**

Qofka adigoo kale ah oo macaamil shirkadda Sandviken Energi ka ah, waxaad shaac-bixin doonta in lacagta warqadda kharashka korontada lagu bixiyo [elnätsfaktura] ay ka badan tahay tii hore, iyadoo islamarkaas wax iska dhimi doono lacagta warqadda kharashka korontada lagu bixiyo ee shirkadda [elhandelsföretag] ku soo dirtay. Baarlamaanka ayaa wuxuu go'aamiyay in anaga oo ah shirkadda adeegyada korontada [elnätsföretag], nala xilsaaray in canshuuraha tamarta aan macaamiisha ka qaadno. Nidaamka cusub wuxuu hirgalay 1 jannayo 2018.

Tan iyo maanta shirkadaha korontada ka ganacsada, ayaa canshuuraha macaamiisha ka qaadi jiray. Xilkaasoo imminka lagu wareejyay shirkadda shabaqa korontada. Haseyeeshe, waa isbedel aan saamayn ku yeelan doonin isku-darka kharshyada korontada.

Markii aad bixiso canshuurta tamarta kaddib, waxaan lacagta u gudbin doonaa akawntiga Hey'adda canshuuraha [Skatteverket]. Canshuurta tamarta 2018 waa 33,1 öre/kWh aan canshuurta badeecadaha/adeegyada lagu xisaabin (41,38 öre/kWh canshuurta badeecadaha/adeegyada lagu xisaabiyay).

Warbixin dheeraad ku saabsan isbedelka, booqo [www.sandvikenenergi.se/energiskatt](http://www.sandvikenenergi.se/energiskatt)

## **Maxay ku kala duwan yihiin shirkadaha ganacsiga korontada [elhandel] iyo shabaqada korontada [elnät]?**

Ma dooran kartid shirkadda shabaqada korontada. Maxaayeelay shirkadda [Sandviken Energi Elnät AB] ayaa iskaleh, maamusha oona mareeysa dhammaan filooyinka iyo maxatadaha korontada ee ku yaalaan degmada aad degan tahay. Waxaan mas'uul ka nahay in korontada gurigaaga la soo gaar siiyo.

Shirkadaha korontada ka gacansada, waa shirkadda aad korontada ka iibsadayso. Shirkadda [Sandviken Energi] koronto ma iibiso. Korontada waxaa laga iibsada shirkadda korontada ka ganacsata ee aad heshiiska la gashay.

## **Warbixin dheeraad**

Wixii su'aallo ah waxaad kala xiriiri karta adeegga macaamiisha, tal 026-24 16 00 ama e-mail u dir [info@sandvikenenergi.se](mailto:info@sandvikenenergi.se). Ama booqo xafiiskeenna ku yaallo Gävlevägen 96 Sandviken. Ku soo-dhowow!

Salaan wacan naga guddooma  
Sandviken Energi